



Tallaalka COVID-19 – Waxaad U baahan tahay inaad Ogaato

- Tallaalka waxa uu ka ilaalin karaa dadku inay qaadaan COVID-19. Haddii dadku ay qaadaan cudurka, sidoo kale waxay ka ilaalisaa iyaga inay u jiranaadaan COVID-19.
- Pfizer waa tallaalka mRNA. Kama qaadi kartid COVID-19 tallaalkan.
- Carruurta iyo da'aha dhalinta 5 ama ka wayn waxay u baahan doonaa labba garoojo oo tallaalka carruurta Pfizer ah. Si buuxda ayaa lagu tallaala 14 maalmood ka dib garoojada labbaad.
- Haddii ilmahaagu u dhexeeyo 5 iyo 11 sano jir oo helo labba garoojo ka hor inta aanay gaadhin 12, waxay heli doonaan labba garoojo oo tallaalka carruurta ah. Garoojadooda kowaad iyo labbaad waxa uu dhaxayn doonaa ugu yaraan 8 todobaad.
- Haddii ilmahaagu helo garoojadooda koowaad da'da 11, waxay ka heli doonaa tallaalka carruurta oo hal garoojo keliya ah. Hadidi ay 12 gaadhaan wakhtiga garoojadooda labbaad ee tallaalka, waxay qaadan doonaan tallaalka kurayda/dadka waa wayn ilaa labba garoojo. Labbada garoojo ee tallaalku waxaa u dhaxayn doontaa ugu yaraan 8 todobaad.
- Haddii ilmahaagu 12 sano jir yahay ama ka wayn yahay waxay qaadan doonaa garoojooyinka kurayda/dadka waa wayn ugu yaraan 28 maalmood u dhaxayso. Si kastaba ha ahaatee, waxaa lagu talinayaa inaad sugto 8 todobaad ee u dhaxaysa garoojooyinka tallaalka.
- Fayraska COVID-19 way isbeddeshaa. Kuwan waxaa loogu yeedhaa noocyo. Noocyada fayraska qaarkood, sida nooca Delta, aad ayay u faafid badan yihiin oo waxay ka dhigaan dhalinyarada, carruurta, iyo dhalin yarta inay jiradu ku sii badato. Tallaalka COVID-19 waxa uu bixiyaa ka ilaalinta ku lidka ah noocyada fayraska.
- Macluumaadka dheeraad ah si loo taageero ilmahaaga in la tallaalo waxaa laga heli karaa <https://novascotia.ca/coronavirus/vaccinate-ns/>



Qayb ka noqo jidkayaga hore u socda.



Helida Tallaalka COVID-19

- Tallaalka COVID-19 waa bilaash. Qof kasta oo ah 5 iyo ka wayn oo jooga Nova Scotia way heli karaan tallaalka haddii ay doonayaan.
- Ilmahaagu waxa uu u baahan doonaa labba garoojo si looga fekeri in si buuxda loo tallaalay. Si buuxda ayaa lagu tallaala 14 maalmood ka dib garoojada labbaad.
- Waxaa si xoogan laguugu dhiirigeliyaa inaad ballanta ilmahaaga uga qabato **novascotia.ca/vaccination**
 - Waxaad u baahan doontaa kaadhka caafimaadka Nova Scotia iyo cinwaanka iimaylka ama lambarka telefoonka si looga qabsado onlaynka
- Haddii aanad ka qabsan karin ballanta onlaynka, waxaad ugu qaban kartaa ballanta ilmahaaga telefoonka. Soo wac **1-833-797-7772** (wicitaan bilaash ah)
 - Uma baahnid kaadhka caafimaadka si loogu diiwaansado teleoonka.
 - Waxaad waydiisan kartaa turjubaan marka aad soo wacdo lambarkan.
- Carruurta iyo dhalin yarada, sida dadka waa wayn, waxay la kulmi karaan saamaynta xun ee degen sida bararka muruqyada, dareemida daalka, qandho degen ama gacan boog leh halka tallaalka lagaga muday. Tani waa caadi. Macnaheedu waxa weeye tallaalka wuu shaqaynayaa oo waxa uu barayaa jidhka sida loola dagaalamo fayraska.

